



E-mail: awdigilrescuecouncil@gmail.com

GOLAHA SAMATABIXINTA AWEDIGIL

AWDIGIL RESCUE COUNCIL

Ref: GSAD/24/GS/007

Isniin, 09 Sebteembar 2024

Warsaxaafadeed: Arimaha Gobolka Shabeelaha Hoose

Golaha Samatabixinta Aw-Digil waxa uu halkaan ku soo gudbinayaa mowqifkiisa iyo aragtidiisa ku aadan arimaha ku saabsan dhibaatooyinka ka soo cusboonaaday isbaarooyinka ee deegaanka Yaaqbariweyne ee degmada Wanalweyn. Gaar ahaan isbaarooyinka yaalada wadada isku xirta Baydhabo iyo Wanlaweyn. Qoraalka hoose waxaan ku soo gudbiynaynaa mowqifka Golaha Samatabixinta Aw-Digil iyo xaaladda Gobolka Shabeelaha Hoose.

1. Goluhu waxa uu marka hore ku taageerayaa Dowlad Goboleedka KGS burburinta isbaarooyinka laga unkey meelo badan oo ka tirsan deegaannada Shabeelaha hoose iyo sugidda guud ahaan nabadgalyada deegaannada KGS.
2. Goluhu waxa uu halkaan ku cadaynayaa in dadka deggan Gobolka Shabeelaha Hoose, gaar ahaan beel weynta Digil in ay taageersanyihiin Dowlad Goboleedka KGS islamarkaasna dadka deegaanka ay ka tirsanyihiin Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya.
3. Goluhu waxa uu si xooggan uga soo horjeedaa hadallada ka soo yeeray qaar kamid ah nabadoonnada ama salaadiinta ka soo jeeda beelaha Hawiye ee todobaadkii hore ku shiray maagaalada Muqdishu. Kuwaas oo muujinaayay abaabulka colaalado iyo hadalo aan laga fiirsan ee xanaf leh ee ku saabsan taageeridda isbaarooyinka yaalla deegaannada Shabeelaha Hoose, gaar ahaan deegaanka Yaaqbariweyne. Xallinta dhibaatooyinka isbaarooyinkaas waxa ay u taalaa Dowlad Goboleedka KGS iyo dadka deegaanka.
4. Goluhu waxa uu ugu baaqayaa Dowlad Goboleedka KGS ee uu hadda madaxweyne ka yahay Mudane Casbdicasiis Xassan Maxammed (Lafta Gareen) in uu ka shaqeeyo sidii ciidamada daraawiishta ee ka dhisan deegaanka Shabeelaha hoose loo horumarin lahaa looguna heli lahaa mushaaroyin iyo agabka ciidamada u baahanyahay. Dadka deegaanka Shabeelaha hoose waxa ay diyaar u yihiin difaaca deegaankooda iyo dalkooda. Laakiin waxaad mooda in aysan helin taageero siyaasadeed iyo mid ciidan oo lagu dhisi lahaa ciidan daraawiish ee suga nababgalyada deegaanka Shabeelaha hoose.
5. Goluhu waxa uu ugu baaqayaa Dowladda Federalka Soomaaliya gaar ahaan Madaxweyne Hassan Sheikh, Ra'iisulwasaare Xamse Barre iyo Wasiirka Gaashaandhigga Dowladda Soomaaliya Mudane Cabdulqaadir Mohamed Nuur in

wax laga qabto cadaalad darrada ka jirta Ciidamada Dowladda Federalka Soomaaliya ee ka howlagala deegaanka Shabeelaha Hoose. Dadka deegaanka Shabeelaha hoose waxa ay aaminsanyihiin in aan laga qeyb gelin ciidanka Dowladda Federalka Soomaaliya ee ku sugan deegaanka Shabeelaha Hoose. Waayo, dadka deegaanka waxa ay u arkaan arintaan in fuquuq uu ka jiro dhinaca qorridda Ciidamada Dowladda Federalka Soomaaliya. Ciidankaas ayaa intiisa badan laga keenaa ama ka kooban beelo gaar ah, dadkii deegaanka Shabeelaha hoose in aysan wax ciidan ama saraakiil ah aysan ku lahayn ciidankaas ku magacaaban ciidan qaran! Taani waxa ay abuuraysaa in dadka deegaanka aysan wax taageero ah u fidinin ciidan aan ahayn ciidan qaran, ama ciidan ka soo jeeda hal beel keliya ama lagu faquuqo beelaha ka soo jeeda Shabeelaha Hoose.

Waxaa kaloo jirta in goobaha ay ku sugan yihiin Ciidamada Dowladda Federalka ee deegaanka Shabeelaha hoose in meelo u dhow ay yaalaan isbaarooyin laakin nasiib darro in ciidankaas aysan waxba qaban isbaarooyinkaas oo sharci darrada ku dhisan. Tani waxa ay kaloo dhaawac u geysanaysaa midnimada, kalsoonida, wadanoolaashaha iyo waxwada wadaagga dadka iyo dalka Soomaaliya.

6. Goluhu waxa uu hoosta ka xariiqayaa in midnimada dadka iyo dalka Soomaaliya ay tahay muqadas loona baahanyahay ciidan shisheeya oo ka shaqeeya dano gaar ah ama maslaxad siyaad gaar ah. Waxaa kale oo uu Golaha Samatabixinta AW-Digil aaminsanyahay in laga hortago wax alla wixii kala qeybin kara bulshada Soomaaliya, taas oo ay ugu horeyso cadaalada darrada iyo ku tumashada awood qeybsiga maamulka dalka. Soomaaliya waxa ay u baahantahay madax kastabata kalsoonida shacabka ee uma baahna madax ka shaqeysa kasbashada taageerada ciidamo ama dowladdo shisheeye, kuwaas oo leh dano iska soo horjeeda.
7. Goluhu waxaa kale oo uu ugu baaqayaa in Dowladda Federalka Soomaaliya, Dolwlad- Goboleedka KGS, iyo hay'adaha gargaarka ee caalamiga in ay wax ka qabtaan arimaha daadadka soo noqnoqonaya ee ka bilowday deegaannada Afgooye iyo qaar ka mid ah deegmooyinka Shabeelaha Hoose. Waxaa kale oo Goluhu ugu baaqayaa dadka ku nool dibadaha ee ka soo jeeda Shabeelaha hoose in ay iyagana wixii karaan kooda ah ay ku caawiyaan dadka ku dhibaateysan deegaannada Shabeelaha hoose ee daadadka iyo masiibooyinka kale ay saameeyeen.

Mahadsanidiin.



Ahmed Mohamed Lucman
Gudoomiyaha Golaha Samatabxinta AW-Digil
E-mail: awdigilrescuecouncil@gmail.com